

Mushaharka Ugu Yar



Bureau of Labor Standards

Shuruucda Shaqada ee Gobolka Maine waxay ilaalinayaan dadka ka shaqeeya Maine. Waaxda Shaqada ee Maine ayaa maamusha shuruucda, kuwaas oo loo baahan yahay in ay raacaan dhammaan shaqo-bixiyeyaashu. Wakiillada waaxdu waxay kormeeraan goobaha shaqada si loo hubiyo in la raacayo sharciga. Digniino iyo ganaaxyo ayaa la siin karaa shaqo-bixiyeyaasha aan u hoggaansamin.



Sharciga Maine (Cuqaal 26 M.R.S.A. § 42-B) waxa uu farayaa in shaqo-bixiye kasta uu ku dhejiyo boodhkan goobta shaqada halka ay shaqaaluhu si fudud u arki karaan shaqaaluhuna si fudud ugu arki karaan.

Boodhkani waxa uu si bilaash ah uga diyaar yahay internet-ka waxaana la koobi karaa: <https://www.maine.gov/labor/posters/>

Mushaharka Ugu Yar ee Beeraha iyo AanBeeraha ahayn waa \$15.10 saacaddii, oo dhaqan gelaya 1, Janaayo 2026.

Mushaharka Ugu Yar

Sida uu qabo sharciga shaqada ee Maine, dhammaan ganacsiyada beeraha iyo aan beeraha ahayn ee ku shaqeeya gobolka oo leh hal shaqaale ayaa si toos ah ugu jira sharciga gobolka. Tani waxay ku jirtaa dhammaan shaqo-bixiyeyaasha dawladda iyo kuwa gaarka ah, iyada oo aan loo eegin faa'iido ama cabbir. Laga bilaabo 1, Janaayo 2026, mushaharka ugu yar ee Maine waa \$15.10 saacaddii.

Xeerarka Mushaharka Ugu Yar ee Degmooyinka

Shaqo-bixiyeyaasha leh shaqaale ka shaqeeya Bangor iyo/ama Portland ama degmo kale oo soo saarta xeer mushahar ugu yar ah ayaa laga yaabaa inay ku dhacaan sharciyo dheeraad ah, sidaas darteed waa inay la xiriiraan mas'uuliyiinta degmada.

Shaqaaale Adeeg

Shaqaaale adeeg waa qof si joogto ah bishii uga hela in ka badan \$191 gunnooyin. Laga bilaabo 1, Janaayo 2026, shaqo-bixiyeyaasha waa inay bixiyaan mushahar adeeg toos ah oo ugu yaraan ah \$7.55 saacaddii. Haddii mushaharka tooska ah ee shaqaalaha iyo gunnooyinka uu helo aysan celcelis ahaan toddobaadkii gaadhin mushaharka ugu yar ee gobolka, shaqo-bixiyuhu waa inuu bixiyaa farqiga.

Saacado Dheeraad ah

Haddii aan si gaar ah looga dhaafin, shaqaaluhu waa inay helaan mushahar saacado dheeraad ah haddii ay ka shaqeeyaan in ka badan 40 saacadood usbuucii, mushaharkuna waa inuu ahaadaa ugu yaraan hal iyo badh jeer mushaharkooda caadiga ah. Shaqo-bixiyeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay oggolaadaan ama diidaan saacado dheeraad ah, laakiin haddii la shaqeeyo saacado dheeraad ah, waa in lagu bixiyaa sida uu qabo sharciga gobolka. Magdhawga ama wakhtiga "comp" ma isticmaali karaan loo-shaqeeyayaasha gaarka ah, inkastoo loo-shaqeeyayaasha gaarka loo leeyahay ay u oggolaan karaan shaqaalaha inay waqtigooda ku beddelaan usbuuca shaqada (laakin ma aha xilliga mushaharka haddii muddada lacag-bixinta ay ka badan tahay wareegga toddobada maalmood ee toddobaadka shaqada).

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Maine Department of Labor
Bureau of Labor Standards
45 State House Station
Augusta, Maine 04333-0045
Telefoon: 207-623-7900

Isticmaalayaasha TTY ha wacaan Maine Relay 711.

Bogga internet-ka: www.maine.gov/labor/bls

limayl: bls.mdol@maine.gov

Ka-reebitaannada Saacadaha Dheeraadka ah

Shuruucda Maine waxay tixraacaan shuruudaha mushaharka ee ku xusan Sharciga Heerarka Shaqada ee Caddaaladda (Fair Labor Standards Act, FLSA). Laga bilaabo 1, Janaayo 2026, shuruudda mushaharka ugu yar waxay noqon doontaa \$871.16 usbuucii. Mushaharku waa hal qodob oo keliya oo lagu go'aamiyo in shaqaale laga dhaafdo saacadaha dheeraadka ah iyadoo la raacayo sharciga federaalka ama kan gobolka. Waajibbaadka shaqsi kasta waa in la tixgeliyaa qayb ka mid ah falanqayntan. Ku guuldarraysta in la raaco labada shuruudood—imtxaanka waajibbaadka iyo heerka mushaharka toddobaadlaha ah—waxay ka dhigan tahay jebinta sharciga gobolka iyo suuragal ahaan mid federaal ah iyadoo ku xidhan farqiga sharciyada.

Bayaannada Shaqaalaha

Shaqaaleysi kasta waa inuu shaqaalaha siiyo marka la bixiyo mushaharka warqad si cad u muujinaysa taariikhda muddada mushaharka, saacadaha la shaqeeyay, wadarta dakhliga iyo jarista faahfaahsan.

Kaydinta Xogta

Shaqaaleysiintu waa inay saddex sano hayaan diiwaanno sax ah oo muujinaya saacadaha la shaqeeyay iyo mushaharka la siiyay dhammaan shaqaalaha.

Waaxda Shaqada ayaa fulisa sharciyada gobolka ee mushaharka iyo saacadaha shaqada. Shaqaaleysiinta su'aalaha ka qaba sharciga waxay wici karaan 207-623-7900 ama waxay booqan karaan bogga internetka ee waaxda.

Hagidda Mushaharka Ugu Yar

www.maine.gov/labor/labor_laws/minimum_wage_faq.html
legislature.maine.gov/statutes/26/title26sec664.html

Hagidda Saacadaha Dheeraadka ah

www.maine.gov/labor/labor_laws/overtime.html
legislature.maine.gov/statutes/26/title26sec664.html

**Ogeysiis: Shaqaaleysiinta Maine waxaa sidoo kale dabooli kara Sharciga Heerarka Shaqada ee Caddaaladda. Wixii faahfaahin ah, kala xidhiidh Xafiiska Mushaharka iyo Saacadaha ee Waaxda Shaqada Mareykanka 603-666-7716.*